

TALOYINKA AAFADA OO DHAKHSO LEH: NADIIFINTA AASAASIGA AH**Sawir ka qaad burburka daadka**

Ka qaad sawirro dhismaha iyo waxyaabaha ku jiray kahor intaadan bilaabin nadiifinta. Sawirrada ayaa kaa caawin doona sheegashada caymiska.

Badbaadadaada ka shaqee markaad nadiifineyso

Gasho “N-95 respirator” (qalabka neefta), kabo buudh caag ah, cinjirka gacmaha la gasho oo(gloves) caag ah.

Ka taxaddar asbeestoska

Ilaka (fiber) asbeestoska engegan ayaa gali kara sambabada markaad neefsaneysa. Waxay keeni kartaa kansar. Asbeestoska qoyan ayaa suurtagalkiisu ka yar-yahay inuu hawada galo. Haddii u gurigaaga ama dhismahaagu leeyahay asbestos:

- U wac shirkad asbestos inay si badbaado leh u qaaddo; iyo
- U wac MPCA (651-296-6300) sidii aad u heli lahayd meesha aad geyn lahayd si badbaado leh.

Haddii aad u maleyneyso inaad leedahay asbestos:

- U fiirso qoraal (calaamad) oranaya asbestos; iyo
- U wac shirkad asbestos inay ku caawiyaan.

Waxa ay tahay in la tuuro

Soo bixi oo iska tuur waxyaabaha biyaha liqa. Alwaaxa, loox-derbiga (wallboard), waraaq-derbiga, dahaarka guriga (insulation), roogagga, iyo joodariyada (firaashyada) ayey bolalka jirro ku ridi kara uu ka bixin karaa. Markaad ka shikisan tahay iska tuur!

***Si fiican u dhaq gacmaha had iyo jeer.
Ku dhaq saabuun iyo biyo badbaado leh!***

Ka xoq oo nadiifi meelaha adag Marka hore, si adag ugu xoq sabuun iyo biyo badbaado leh meelaha aan “biyaha liqin” (“nonporous”) sida

sibidhka, meelaha sida miiska dushiisa oo kale ah iyo qalabyada guriga la isticmaalo (appliances). Ka raaci biyo badbaado leh. Xoq oo nadiifi oo ka raaci biyo badbaado leh ka hor intaadan isticmaalin isku-dar biliij ah (bleach mix). Ha ku darin biliijka saabuunta ama sheyda kale. Fiiri “Talooyin Dhakhso Leh Oo Aafada Ku Saabsan: Istickmaalka biliijka.”

Gurigaaga engeji (qalaji)

Fur albaabbada iyo dariishadaha. Istickmaal maraawaxado iyo qalabyada qoyaanka guriga ka saara (dehumidifiers) sidii aad guriga u engejin lahayd.

U Istickmaal si badbaado leh qalabyada shidaalka tamarta lagu siiyo.

Had iyo jeer ku isticmaal dibbada – waligaa haku isticmaalin gudaha:

- injiinnada baasinka (gasoliinta) loogu isticmaalo soo nuugga biyaha ama sidii tamar loo abuuri lahaa; ama
- qalabyada cuntada solka ee isticmaala gaasta dabiiciga ah ama dhuxusha.

Istickmaal qalabyada adiga oo ka fogaanaya meelaha meegaaran ama xerada ah, garaashyada, dariishadaha furan agtooda ama albaabada, ama hawo qaatayaasha. Waxay sameeyaan hawooyin keeni kara xannuun ama dhimasho.

Nadiifi shidaalka-saliidda qubata

Xiro dhar aan nuuqin (liqin) saliidda markaad nadiifineyso. Ka fogee carruurta iyo rabbaayadaha shidaalka-saliidda qubata. Hawo cusub ku dhex wareeji goobta. Iska tuur sheyda biyaha liqa ee nuugey saliidda. Ka fogow wixii kasta ee dab kicin kara. Wixii saliid (shidaal) ah ee qubtaa waa halis keeni karta dab.

U wargali qubashada Sarkaalka Goob-joogga ah ee gobolka taleefanka (651) 649-5451 ama (800) 422-0798.



Environmental Health Division
625 North Robert Street
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
(651) 201-5000
www.health.state.mn.us

Haddii aad ugu baahato dokumentigan qaab kale oo ay ka midka yihiin farta waaweyn, Braille, ama cajalad, la xiriir (651) 201-5000 ama (800) 657-3908.

Dadka dhagaha la' ama dadka maqalku ku culus yahay TTY: (651) 201-5797.